

HEERKA OSLO EE DUGSIGA FIRFIRCOONIDA

Heerka Oslo wuxuu sharraxayaa waxa ay waalidku ka fili karaan dugsiga firfircoonida. Wuxuu kale oo sharraxayaa waxa ay filayaan waaliddiinta ay carruurtoodu ka qaybqaadato deeqdan. Heerku wuxuu ka kooban yahay afar meelood oo lagu soo doortay qorshaha Dugsiga firfircoonida iyo go'aammada heerka nidaamka dugsiyada la joogo marka fasaxa la yahay (skolefritidsordninger) ee degmada Oslo. Heerka Oslo wuxuu laga billaabo 1-da ogoosto 2011 ka shaqaynayaa dhammaan dugsiyada firfircoonida.

WAXA UU KA KOOBAN YAHAY IYO HIYIGA

Maxaad ka fili kartaa Dugsiga firfircoonida?

- Xiriir fiican ayaa ka dhexeeya waxa ay ka kooban yihiin iyo firfircoonida dugsiga iyo kuwa Dugsiga firfircoonida
- Dugsiga firfircoonidu wuxuu bixiyaa firfircooni habaysan oo la xiriirta hadafyada manhajka waxbarashada
- Waxaad haysaa qorshayaasha Dugsiga firfircoonida

Muxuu kaa fili karaa dugsiga firfircoonidu?

- Waad la soconaysaa maalinta dugsiga firfircoonida ee ilmahaaga



AMMAAN, KA-HELID IYO DARYEEL

Maxaad ka fili kartaa Dugsiga firfircoonida?

- Waxaa lagu sheegayaa nidaamyada joogtada ah ee Dugsiga firfircoonida, sida xagga ammaanka oo kale
- Warbixinta aad u baahan tahay waxaad haysaa wakhti fiican hortiiis
- Waxaad arki doontaa in uu ilmahaagu ka helo Dugsiga firfircoonida
- Waxaad arki doontaa in shaqaalaha Dugsiga firfircoonidu ay yihiin kuwo furfuran
- Waa lagula soo xiriirayaa haddii ay jiraan wax gaar ah oo ilmahaaga u saabsan

Muxuu kaa fili karaa dugsiga firfircoonidu?

- Dugsiga firfircoonida waxaad siinaysaa wixii warbixin loo baahan yahay ah oo ilmahaaga ku saabsan
- Shaqaalaha Dugsiga firfircoonida waxaad ula dhaqmaysaa si xushmad leh
- Adiga ayaa hubinaya in ilmahaagu wato qalabkii saxda ahaa mararka uu Dugsiga firfircoonidu u baxayo firfircooni horay loo sii qorsheeyay



Waaxda waxbarashada ayaa mas'uul ka ah Dugsiga firfircoonida ee Oslo. Dugsiga firfircoonidu wuxuu bixinayaa deeq gacan ka geysanaysa waxbarashada ilmaha ee xagga maaddada iyo xagga bulshada. Dugsigafirfircoonidu wuxuu yeelanayaa xeerar muuqda wuxuuna carruurta ku dhiir-rigelinayaa habdhaqan fiican.

Dugsi walba wuxuu diyaarinayaa qorshe muujinaya deeqda firfircoonida ee dugsigaas firfircoonida. Qorshaha Dugsiga firfircoonida ayaa gundhig u ah qorshayaasha dugsiga.

Maammulaha ayaa maaddo ahaan iyo maammul ahaanba madax ka ah Dugsiga firfircoonida isaga ayaana mas'uul ka ah in dugsiga iyo Dugsiga firfircoonidu ay ka wada shaqeeyaan horumarka ardayga ee xagga maaddo, xagga bulsho iyo xagga qof ahaaneed intaba.

Warbixin intan ka badan oo ku saabsan deeqda dugsiga firfircoonida ee dugsigaaga ka akhriso:

www.magaca.dugsiga.gs.oslo.no



QAAB IYO ISKU-HALLAYN

Maxaad ka fili kartaa Dugsiga firfircoonida?

- Dugsiga firfircoonidu wuxuu la socdaa xeerarka deggenaashada ee dugsiga waxaana ka jira qaab iyo isku-hallayn
- Warbixin muhiim ah oo loo baahan yahay ayaad ka helaysaa bogga internetka ee dugsiga iyo Fronter-ka
- Waxaad helaysaa warbixinta xilliyada uu Dugsiga firfircoonidu furan yahay iyo qorshaha fasaxa
- Waxaad helaysaa warbixinta firfircoonida guud ee ka jirta Dugsiga firfircoonida
- Waxaad helaysaa warbixinta firfircoonida uu ilmahaagu ka qaybqaato

Muxuu kaa fili karaa dugsiga firfircoonidu?

- Waxaad ilmahaaga soo qaadanaysaa xilliga ay meeshu furan tahay
- Lacagta haynta ilmaha waxaad ku bixinaysaa wakhtiga loogu talo galay gudihiisa
- Waxaad u kuurgalaysaa go'aammada iyo qorshayaasha Dugsiga firfircoonida
- Waxaad wakhtiga loogu tala galay uga soo jawaabaysaa xiriirrada uu Dugsiga firfircoonidu kula soo sameeyo ee ku saabsan isku-qoridda fasaxyada, firfircoonida iyo waxyaalaha kale ee la midka ah



WADAHADAL IYO WADASHAQAYN

Maxaad ka fili kartaa Dugsiga firfircoonida?

- Waxaad fursad u helaysaa in aad saamayn ku yeelato waxa ka dhaca Dugsiga firfircoonida adiga oo soo maraya FAU iyo guddiga maamulka dugsiga
- Shirar ayaa lagu casumayaa

Muxuu kaa fili karaa dugsiga firfircoonidu?

- Dugsiga firfircoonida waad u sheegaysaa waxyaalaha aad maqsuudka ka tahay iyo kuwa aadan maqsuudka ka ahayn
- Waxaad ka qaybqaadanaysaa baaritaannada isticmaalayaasha
- Waxaad ka qaybqaadanaysaa shirarka iyo qabanqaabooyinka bulsho



HEERIKKA OSLO

Dugsiga firfircoonida

